FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada Soomaaliya

Hubinta Cuntada iyo Nafaqada

Warbixinta Kooban ee October 2005

Waxa la soo saaray
October 12, 2005

Tilmaamaha

Cimilada

Suuqyada

Nafqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha ka Soo Shaacbaxaya Gobollada

FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka: +254 20 374 5734
Faakiska: +254 20 374 5098
Email:fsauinfo@fsau.or.ke
Websaytka:
www.fsausomali.org

WARBIXIN KOOBAN OO GAAR AH

Warbixinta bishan ee koobani way ka duwantahay ta caadiga ah ee lagu falanqeeyo qaybaha ama lagu tilmaamo arrimaha muhiimka ah. Kadib baadhitaan lagu cusboonaysiinayey hab-nololeedka aasaasiga ah oo ka socday bil gudaha dalka (September iyo October), maqaalkani wuxuu ku koobanyahay arrimaha soo shaacbaxaya sida ay u taabanayaan jawaab-celinta.

NABAD LA'AANTU WAXAY KU WADDAA INAY HALIS KU HAYSO HUBINTA CUNTADA IYO HAB-NOLOLEEDKA KOONFURTA SOOMAALIYA

Xiisadda aan la xalilin ee ka dhex jirta Dawladda ku Meelgaadhka ah ee Federaaliga ah ee Soomaaliya (TFG) waxay ku waddaa inay keenayso walaac. Warar dhowaan soo baxay ayaa sheegaya in hubka dibedda laga keenayaa uu aad u sii kordhay taasoo tilmaan ka bixinayaan in xiisaddu ay tahay mid keeni karta dagaal. Dagaal hubaysani hadduu dhaco wuxuu si toos ah oo balaadhan u taabanayaa hubinta cuntada iyo hab-nololeedka. Sidaas darteed in qorshayn la sameeyaa waa arrin degdeg ah oo mudnaan leh.

Doorashooyinka oo si nabad ah oo diimuquraadi ah uga dhacay Soomaalilaand waxay si toos ah wax tar ugu keeni doonaan horumarinta hubinta cuntada, oo ay ku jirto ururrada shacbiga oo si fiican u shaqeeya, xasilloonida suuqyada iyo in lagu dhiirrado in maalgelin lagu sameeyo gobolladaas.

Labadii bilood ee la soo dhaafay, waxa jiray xiisad iyo nabad la'aan ku kooban dhowr goobood oo ah koonfurta Soomaaliya, gaarahaan gobollada Bay iyo Bakool, siiba degmooyinka Qansaxdheere, Diinsoor iyo Baydhaba. Colaadda ku kooban goobaha qaar way sii korodhay sababtoo ah xiisadda siyaasadda ee sii kordhaysa iyo colaadda ku salaysan saadka ee sii korodhay taasoo ku saabban helitaanka biyaha iyo dhulka. Haddii aan la xalilin, nabad la'aan sii korodha iyo xiisaddu waxay qasi doonaan howlaha beeraha ee ka hor Deyrta '05 ama gudaha October iyo November. Soosaarka dalagga Deyrta '05 hadduu noqdo mid liita wuxuu halis sii gelin doona hubinta cuntada ee goobaha laga beero hadhuudhka, marka la eego sida aan loogu guulaysan badi soosaarkii dalagga ee Guga '05 (31% ceceliska dagaalka kadib ayaa lagu guulaystay Bay, bakoolna 36%).

Jawaab-celinta bina-aadamnimada ee Kismaayo iyo hareeraheeda mija-xaabin ayaa ku dhacday kadib markii lagu dilay Kismaayo qof ka mid ahaa shaqaalaha Jimciyadda Quruumaha ka Dhaxaysa 3dii October 2005. Arrintan murugada lihi waxay keentay in degdeg loo joojiyo howlii Jimciyadda Quruumaha Ka Dhaxaysaa ay rabtay inay dib uga billowdo gobolkaas aayaha danbena waxay xaddidi doontaa gaadhsiinta gargaarka bana-aadamnimada ee bulshooyinka ay dhibaatooyinku sida xun u taabteen ee jubbooyinka.

Sida ay arrimahani u taabanayaan jawaab-celinta: waa in la sameeyo qorshe haddii ay timaaddo in looga baahdo gargaar bina-aadamnimo oo balaadhan Koonfurta Soomaaliya taasoo ah arrin degdeg ah oo mudnaan leh. Nabad la'aanta iyo xiisaddu haddii ay sii socoto waxay noqon doonaan arrimaha ugu waaweyn ee taabta hubin la'aanta cuntada iyo hab-nololeedka dhammaan gobolkaas. Haddii sababaha keena dhibaatooyinka aan wax laga qaban, Jawaab-celinta ama tallaabooyinka bina-aadamnimada iyo kaalmada horumarintu waxay noqon doonaan kuwo aan joogto ahayn ama aan wax tar lahayn. Hirgelinta hubinta cuntada iyo hab-nololeedkuna waxay noqon doontaa mid aan rasmi ahayn.

BILLOWGA ROOBABKA DEYRTA 2005

Inkasta oo aan la filayn in si buuxda roobabka xilliga Deyrtu ay u billaabmaan illaa badhtamaha October, haddana roobab ayaa ka da'ay billowgii September qaybo ballaadhan oo ka mid ah Waqooyiga. Goobaha ay roobabkaasi ka da'een waxa ku jira badi gobollada Awdal, Waqooyi Galbeed iyo Togdheer iyo qaybo ka mid ah gobollada Sool iyo Sanaag (eeg Khariidadda 1 iyo Warbixinta Xogta Cimilada, October 12, 2005). Qaybo ka mid ah waqooyiga Gedo iyana waxa ka da'ay roobab badhtamihii bisha September.

Wali degdeg ayay ku tahay in la saadaaliyo natiijooyinka ka soo bixi doona roobabka Deyrta. FSAU iyo FEWS NET waxay ku wadi doonaan inay kormeeraan saadaasha roobabka Deyrta 2005. FEWSNET waxay soo saari doontaa warbixinta ilaalada roobka oo soo baxda tobankii maalmoodba mar.

Khariidadda 1: September '05: Isku-darka roobka (RFE) (mm)



soosaarka dalagga xilliga caadiga ah ka baxsan

GOYNTA U HORRAYSA EE DALAGGA DHULKA BIYO FADHIISINKA LEH EE JUBBA OO KEENTAY INUU AAD HOOS UGU DHACAY QIIMAHA GALAYDU

Gobolka Jubba, daadad waxyeello weyn gaystay bishii June '05 ayaa burburiyey dalagga iyo hanti kale oo muhiim ah. Laakiin daadadkaasi waxay keeneen inuu dhasheeggu buuxsamo, fursad ah in waxa laga beero dhulka biyo fadhiisinka leh iyo in laga kalluumaysto biyaha xareedda ah. Goynta u horraysa ee dalagga xilliga roobka ee caadiga ah ka baxsan (galayda, digirta iyo sisinta) ee la beeray billowgii bishii July, waxay bilaabeen inay gaadhaan suuqyada waaweyn ee gobolkaa. Waxana halka ugu sarraysa ay gaadhi doonaan dabayaaqada bisha October.

Tusmada 1: Celceliska Qiimaha Dalagga (Doolarka Maraykanka)



Taasi waxay keentay in qiimuhu uu aad hoos ugu dhacay. Degmada Bu'aale, Jawaanka galayda ee ah 50-kg wuxuu hoos uga dhacay 150,000 Shilinka Soomaaliya bishii July oo wuxuu noqday 80,000 oo ah Shilinka Soomaaliya dabayaaqadii September/billowgii October. Qiimaha galaydu wuxuu ku fadhiyaa hadda 0.12 Doolarka Maraykanka ah /kg, kaasoo 57% ka hooseeya sidii uu ahaa July. Waxana weeye qiimihii ugu hoseeyey taniyo bishii February 2003 (Tusmada 2). Qiimaha digirta iyo sisintu waxay muujinayaan in sidoo kale qiimuhu uu hoos u dhacay, kaddib goynta dalagga dhulka biyo-fadhiisinka ah ku baxay. Tusaale ahaan, qiimaha kiilooga digirta ahi wuxuu hoos uga dhacay 8,000 shilinka Soomaaliya ah bishii July, waxana uu noqday 3,000 oo shilinka soomaaliya ah dabayaaqadii October.

Rajada laga qabo goynta dalagga xilliga roobka caadiga ah ka baxsan ee Jubbooyinku wuu wanaagsanyahay waxana la filayaa inuu waaro illaa badhtamaha bisha December. Hase yeeshee halista ka imanaysa daaddad inay dhacaan Deyrta (November) way sarraysaa maaddaama badi qararka wabigu ee ay burburiyeen daadadkii dhacay Guga ay weli furanyihiin.

Sida ay arrimahani u taabanayaan jawaab-celinta: Waxa jirta baahi loo qabo in degdeg dib-u-habayn loogu sameeyo qararka biyo xidheemmada iyo wabiyada si looga hortago waxyeelada daadadku ay gaadhsiinayaan dalagga dhulka biyo fadhiisinka ah ku baxay ee hadhay. Tani waxay kale oo ay fududayn doontaa in biyuhu ay sidii hore si ka fiican u socdaan loona isticmaalo soosaarka xilliga Deyrta. In guud ahaan cunto la qaybiyo laguma talinyo xiliga goynta dalagga maaddaama ay taasi cadaadis saari doonto qiimaha beeraha lagaga iibsado dalagga ayna niyad jab ku samayn doonto maalgelinta beeraha.

DADKA BARA-KACAY EE JOOGA BAY IYO BAKOOL

Dadka barakacay ee u qaxaya degmooyinka Qansaxdheere iyo Diinsoor kadib colladda sii socota siina kordhaysa ee ku salaysan biyo iyo daaq ee hareeraha Xabiibayal, Radhoole, Misra (Degmada Diinsoor) iyo Oflow iyo Idaale (Qansaxdheere) waxay keentay walaac sii kordhaya. Warbixinaha gudaha ee FSAU inkasta oo aan weli la xaqiijin waxay tilmaamayaan inay dhici karto in sadex qaybood marka loo qaybiyo qayb ahaan dadka barakacay ay bilaabeen inay ku laabtaan beerahoodi si ay uga qayb qaataan howlaha beeraha iyagoo rajaynaya roobabka Deyrta. Iyadoo laba qaybood ee kele aanay u suurto galayn inay laabtaan. Dalagga waxa laga helayaa suuqyada (gaar ahaan hadhuudhka) qiimuhuna hoos ayuu u dhacay taniyo bishii August (Tusmada 2). Hase yeeshee, dadka barakacay awoodda ay wax ku iibsan karaan way xadiddantahay sababtoo ah waxa yar fursadaha ay dakhli ku heli karaan. Xaaladda hubinta cuntada ee Waajid iyana walaac ayaa laga qabaa sababtoo ah waxa sii kordhay dadka ka soo barakacay goobaha ku hareeraysan nabad la'aanta darteed. FSAU hadda waxay isku dubbarridaysaa koox qiimayn degdeg ah ku sameeya xaaladda goobahaas.

XAALADDA NAFAQADA EE DADKA HARGEYSA KU LAABTAY IYO DADKA KU SOO BARAKACAY OO HORE U MARTAY

Dadka Hargeysa 'Dib ugu laabtay iyo kuwa ka soo barakacay' baadhitaan lagu sameeyey nafaqadooda bishii September 2005 wuxuu muujinayaa in xaaladda nafaqadu ay aad hore ugu martay. Wadarta Nafaqadarrada ee hadda taagan (dherarka oo loo eegay culayska qofka wuxuu ahaa 7.6% taasoo ka hoosaysa heerarkii hore loogu arki jiray dadweynahaas.

Sida ay arrintani u taabanayaan jawaab-celinta: natiijooyinku waxay muujinayaa in marka ay jiraan cimilo nabad iyo xasilooni leh, dhaqaaluhu uu si fiican u socdo, ay jirto kaalmo dadka u fududaynaysa adeegyada bulshada iyo guriyeynta, in bina-aadamku ay ka faaiidaysan doonaan iyo in dib u soo kabasho degdeg ahi ay dhici karto.

DIB U SOO KABASHADA XOOLA-DHAQATADA GOOBAHA SOOL, HAWDKA IYO DOOXADA NUGAAL WAY SOCOTAA

Baadhitaan qoto dheer oo dhowaan FSAU ay ka samaysay (Sept./Oct. '05) Hawdka, Sool iyo dooxada Nugaal waxay dib u sii xaqiijinaysaa in xoola-dhaqatadu ay dib u soo kabanayaan goobahaasi kadib laba xilli oo is xiga oo roobab caadi ka sarreeyaa ay ka da'een (*Deyrtii '04/'05 iyo Gugii '05).*

Hab-nololeedka xoola-dhaqatadu waxay bilaabeen inay dib u soo kabtaan sababtoo ah waxa korodhay tirada xoolaha xaaladda jidhka xooluhuna hore ayay u martay, (gaarahaan adhiga) kadib sannad ay jireen biyo iyo baad ku filani . waxa la rajaynayaa in geela dhalayaa ay aad u badan doonaan labada bilood ee soo socda, maaddaama badidoodu ay rimeen kadib xiligii Deyrta. Iminka cowska si balaadhan ayaa loo helayaa. Guritaan aan caadi ahayn ama habab looga hortago dhibaatooyinka lagama soo sheegin ama laguma arag goobaha baadhitaanka laga soo sameeyey.

Geel badani inay dhalaan ayaa la filayaa bilaha November iyo December kadib kuwo badani markii ay rimeen Deyrtii 04/05. Sawirkan waxa lagu soo qaaday baadhitaankii gudaha ee hab-nololeedka ee FSAU, September 2005

Qoysaska saboolka ahi waxay ka faa'iidaysanayaan xoolaha u kordhay iyagoo taageero ka helay qaysaska xigaalka ah ee ka hantida roon sida inay deynsadaan xoolo ay maalaan. Dhaaminta biyaha ee qoysaska saboolka ah ee ay ka dhinteen awrtii wali waa dhibaato weyn oo jirta. Hase yeeshee, waxa jira caddeyn ah awrta ama dameeraha loo isticmaalo "dhaaminta biyaha" in lala wadaago qoysaska hantida roon.

Heerarka deynta dadka lagu leeyahay weli way sarraysaa dhammaan dadka, laakiin waraysiyo lala yeeshay dadku waxay muujinayaan in dadka hantidoodu dhexdhexaadka tahay iyo kuwa hantida rooni inay bilaabeen inay deynta lagu leeyahay dib u baxsfaan. Qoysaska badan waxay filayaan inay dib u baxshaan deynta lagu leeyahay sannadka soo socda haddii roobabka xiliyada Deyrta iyo Guga dambe ay fiicnaadaan. Soosaarka dhuxushu wuu sii socdaa waanuu ka sii kordhayaa meelo badan, inkastoo ay xoola-dhaqatadu dib u soo kabanayaan. Daraasadda gudaha lagu sameeyey waxay muujinaysaa inaanay xoola-dhaqatadu ahayn dadka ka dambeeya soosaarka dhuxusha. Xoola-dhaqatadu si toos ah uguma luglaha ama ugama faa'iidaystaan soo saarka dhuxusha, inta badanna way ka horjeedaan howlaha noocaas ah. Bulshada xoola-dhaqatada qaarkood ayaa si wax tar leh wax uga qabtay joojinta soosaarka dhuxusha ee goobaha ay degaan iyagoo sameeyey feejignaan iyo xoogba, sida degmooyin ka tirsan Sool, iyadoo kuwo kalena aanay wax badan ka qaban karin sababtoo ah xoogga ay leeyihiin danaha la ilaashanayo dartood. soosaarka iyo ka ganacsiga dhuxushu waxa weeye badeecad lacag badan laga helo oo xidhiidh la leh baahida magaalooyinka iyo suuqyada loo dhoofiyo.

Sannad kadib markii halka ugu sarraysa uu gaadhay gurmadka bina-aadamnimadu (Gugii '04), qoysas badan oo 'xaalufay' ayaa ama ka hadhay xoola-dhaqatonimada ama u guuray magaalooyinka waaweyn ama dib ugu noqday bulshooyinka xoola-dhaqatada. Dadweynahaasi wali way nugulyihiin, laakiin way adagtahay in la tilmaamo ama loo aqoonsado koox u baahan in la kaalmeeyo. Hase yeeshee, waxay ka faa'iidaysan doonaan jawaabcelinta ku aaddan guudahaan taageerada hab-nololeedka ee gobolkaas. Sababtoo ah dhowaan wararka ka soo baxay gudaha, FSAU waxay beddelaysaa qoondaynta xaaladda dadweynahn markaa xaaladoodii ahayd Gurmad Bina-aadamnimo waxay isu beddashay Xiisadda Cuntada iyo Hab-nololeedka ah (Eeg Khariidadda 2).

Sida ay arrimahani u taabanayaan jawaab-celinta: Jawaabcelinta degdegga ah ka imanaysa soo kabashada xoola-dhaqatada ee la arkay waxa weeye in la iska dhaafo jawaan-celintii bina-aadamnimada ee ku koobnayd baahida cuntada ee degdegga ah, oo lagu beddalo jawaab-celin fiirada saaraysa taageerada dib u soo kabashada hab-nololeedka ee soctada sida deynta in la baxsho, xoola goyn, gaarahaan awrta rarada ah, abuuritaan hab-nololeed lagu doorsado gubidda dhuxusha, iyo guudahaan in fiirada la saaro horumarinta aasaasiga ah ee loo baahanyahay ee wax ka qabanaya heerarka sare ee saboolnimada ee ka jira gobolkaas, sida la'aanta dugisyada iyo xarumo caafimaad, isgaadhsiinta iyo mashaariicda loo baahanyahay ee sida waddooyinka iyo wixii la mid ah oo liita.

Xeryaha dadka xaalufay ee ku yaalla dibedda magaalada Qardho oo madhan. Sawirkan waxa lagu soo qaaday baadhitaankii gudaha ee hab-nololeedka ee FSAU, Septem-ber 2005

qoondaynta xaaladda hubinta cuntada

Khariidadda 2: Guga Kadib(July 2005) Qoondaynta ay arrimo badani ku jiraan ee Xaaladda Hubinta Cuntada



FSAU waxay gudaha ka samaysay baadhitaan aasaasi ah iyo falanqayn ku saabsan wararka loogu baahanyahay tixraaca. Waxana laga sameeyey qaybo ka mid ah Waqooyiga iyo badhtamaha Soomaaliya intii u dhaxaysay 9kii September iyo 6dii October 2005. Howshan waxa ku luglahaa shaqaalaha FSAU ee gudaha Soomaaliya ka shaqeeya iyo kuwa Nayroobi uu saldhigoodu yahay oo fiirada saaray tafatiridda xogta 3 goobood oo xoola-dhaqata ah (Sool, Dooxada Nugaal iyo Hawd). Waxa kale oo ay dib u eegeen xoola-dhaqatada Golis iyo Guban iyo xoola-iyo-beera-dhaqatada Waqooyi Galbeed. Warbixino ayaa hadda la diyaarinayaa, kuwaas oo la soo shaac bixin doono bisha November.

Warbixinaha Soo baxay:

Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET, October 12, 2005.
Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET, October 12,, October 12 2005
Warbixinta Nafaqada ee FSAU, September 29, 2005
Falanqaynta Guga 2005 Kadib ee FSAU, Warbixinta Taxanaha Farsamada lambar IV. 7, 13 September 2005.

“Barkacay ay keeneen colaad iyo Abaari - magaalooyinka Qansax-Dheere iyo Dhiinsoor iyo tuulada Misra ee gobolka Bay Region”, Warbixinta Gudaha ee Qiimaynta Wadajirka ay u sameeyeen OCHA, UNICEF, WFP, 22-27 August 2005.

Technical & Managerial Support
Funding Agencies
Technical Partners